



**Inta badan
- maaha inyar!**

Qof kastaa waa inuu helaa fursado loo siman yahay si uu u guulaysto iyo inuu helo caawimaad labadaba markaan u baahanno. Taasi maaha sida maanta xaalku yahay. In badan oo ka mid ah waxyaabaha wanaagsan waxaa qaatay kuwii horeyba u haystay inta ugu badan. Waxaan u baahanahay in bulshadu cadaalad hesho oo ay noqoto bulsha deegaanka saaxiib la ah, maxalli ahaan, qaran ahaan iyo aduunkaba. Waxaan dooneynaa inaan sida ugu fiican u ilaalino bulshada Norway - khilaafaadka yar, yaraynta shaqo la'aanta iyo bulsho xoogan. Waa inaan yareynnaa kala duwanaanshaha, oo aan xoojinaa daryeelka isla markaana waxa ka qabanaa saboolnimada.

Dhibaataada cimilada iyo burburka dabecadda ayaa khatar ku ah mustaqbalkeenna oo dhan, maxaa yeelay faa'iidooyinka muddada-gaaban ayaa laga hor mariyaa deegaanka. Jawaabta dhibaatooyinka aan hada wajaheyno waa inay noqdaan qorshe dhameystiran oo cadaalad ku ah cimilada iyo warshadaha. Qorshe ay la socoto maal-gelinno la taaban karo, laguna siin doono shaqooyin xagga warshadaha sanadaha soo socda. Waxaanu beddeli doonnaa Norway si aan u noqonno waddan hormoodka ah oo adduunka u jiidaya saaxiibtimo deegaan iyo cimilo haboon oo soo dhawayn leh.

Waxaa la joogaa xilligii la heli lahaa siyaasad dhaqaale oo cusub. Mid xallin kara dhibaataada cimilada isla mar ahaantaana yareynaysa sinnaan la'aanta iyo wax ka qabashada shaqo la'aanta. Qorshaha Xisbiga Hantiwadaagga Bidixda ee isbeddelka cagaaran ee caddaaladda ah wuxuu ku saabsan yahay rajo iyo isbeddel. Waxaan yareyn doonnaa kala-duwanaanshaha, waxaan dhisi doonnaa warshadaha oo waxaan la wadaagi doonnaa waxtarka iyo waxyeelada. Markaa waa inayn dhinac iska dhigno nolol-xumada, siyaasada aan furfurnayn iyo siyaasada gacanta xooggan lagu maamulayo ee dawladu doonayso inay dhaqangaliso. Waxaan ka dhigi doonnaa waddanka mid cagaar oo inta badan loogu talo geley - maaha madeeri inta yar loogu talo geley.

Sosialistisk Venstreparti

Hagegata 22, 0653 Oslo
21 93 33 00
post@sv.no
sv.no

